

## مصارف الزكاة

### Axkaamta Sekada

Ma bannaana in sekada la siiyo cid aan ahayn siddeedda qolo ee Quraanku sheegay oo ah: **(Saddaqada "Sekada" waxaa uun mudan fuqarada, masaakiinta, kuwa sekada ka shaqeeya, kuwa la soodhawayn laabtooda, kuwa addoonsiga ku jira, kuwa qaamaysan, kuwa jihaadaya, iyo midka socdaalka ah, waana faral Eebbe yeelay, Eebbe ayaana ah cilmi badan xigmad badan)** [at-Tawbah:60].

Sidaa ayayna isku raaceen culumada afarta mad-habood iyo inta kaleba, kolka isku day in aad sekada siiso ciddii mudnayd hana degdegin oo ha siin cid aanan ahayn kuwa la sheegay:

1. **Fuqarada:** waana kuwa aanan haysan badhka baahidooda (baahidooda kolka laba loo qaybsho qayb ka mid ah) oo cunto iyo dhar iyo degaan (meel ay degaan) iwm oo ah waxyaabo lagama maarmaan ah.
2. **Masaakiinta:** Waa kuwa haysata baahidooda badhkeed iyo wixii ka badan hase ahaatee, baahidooda oo dhammaystiran ma haystaan.
3. **Kuwa ka shaqaynaya sekada:** waa kuwa ay magacawday dowladdu si ay uga soo aruurshaan sekada dadka xoolaha haysta oo aanan mushaar looga qorin baytul-maalka, kooxdanna manta ma jiraan, sidaa darted, qaybtoodu way dhacaysaa.
4. **Kuwa la soo dhawaynayo laabtooda:** Waana kuwa diinta soo galay dhawaan oo niyaddoodu liidato oo aan la qabsan bulshada Islaamka kolka waxaa laga siinayaa qayb sekada si niyadooda loo xoojiyo.
5. **Kuwa la addoonsanayo:** Waana addoomaha heshiiska saxiixa ah galay (si ay isu xoreeyaan) kolka waxaa wax laga siinayaa sekada, dadkaasina waa kuwa kula heshiyyay qofkii addoonsanayay in haddii ay intaas oo lacag ah siiyaan ay xoroobi doonaan, waayahanna way adagtahay in dadkan oo kale la arko.
6. **Kuwa qaamaysan:** Waana kuwa dayn badan lagu leeyahay ee awoodi waayay in ay iska dhiibaan.
7. **Kuwa jihaadaya:** Waa kuwa jihaadka iskaa-waxu-qabso ku aaday oo aanan mushaar qaadnayn. Wuxuu ku yiri Abuu Xayyaan tafsiirka "an-Nahr al-Maad" (jidka Eebbe) waxaa looga jeedaa "mujaahidka" oo wax laga siinayaa sekada. Imaam al-Raazi-na wuxuu tafsiirkiisa ku yiri: (jidka Eebbe) mufasiriintu waxay dhaheen waxaa looga jeedaa "mujaahidiinta". Kolka ma bannaana in loo fasiro (jidka Eebbe) fal kasta oo wanaagsan maxaa yeelay sidaa cid tiri oo culumada mujtahidiinta ah ka mid ah ma jirto. Haddii uu ahaan lahaa fal kasta oo wanaagsan mid soo gelaya weedhii Ilaahay ee ahayd (jidkii Eebbe) rasuulku –nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee- ma uusan dhaheen: "Mid hodon ah wax kuma laha sekada mid xoogleh oo shaqaystana wax kuma laha" waxaa soo weriyay Abuu Daa'uud.
8. **Midka Socdaalka ah:** waana midka safarka ah ee jiscinkiisii go'ay oo aanan helayn wax uu ku cidgalo oo isla markaana jooga dalka sekadu taallo, kolka waxaa xoolaha sekada laga siinayaa wax ku filan si uu safarkiisa u dhamaystirto uguna laabto dalkiisii.

Hadaba hakadigtoonaadeen kuwa aruurinaya sekada ee masaajidda iyo isbitaallada iyo iskuullada ku dhisaya iwm oo mashaariic kale ah, qofkii sekadiisa siiya qof waxyaabaha ku dhisaya sekadiisu ma ansaxayso waxaana ku waajib ah qofkaa in uu dib u baxsho sekadii mar labaad asiga oo siinaya dadkii mudnaa, wuxuuna yiri Rasuulku –nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee- "Dad ayaa iska faragelinaya xoolaha Ilaahay xaqdarro, kuwaasi naar bay leeyihiin maalinta qiyaamaha" waxaa weriyay al-Bukhaari.